



Bridging Refugee Youth & Children's Services

This document is provided by the BRYCS Clearinghouse.

Dhalinyarada iyo xafladaha -Teens and Social Gatherings

By Colleen Gengler

Reproduced with permission of the University of MN

© 2003



BRYCS is a project of the United States Conference of Catholic Bishops/Migration and Refugee Services (USCCB/MRS)

1-888-572-6500/ info@brycs.org/ www.brycs.org



Dhalinyarada iyo xafladaha -Teens and Social Gatherings

Waxaa laga yaabaa in dhalinyaradu ku waydiisato ogolaansho in ay ka qaybqaataan xafladaha sida cayaraaha qoobka cayaarka ee lagu qabto iskuulada, aroosyada, iyadoo qof waalid ahi joogo ama uusan joogin. Tani waxay ka midtahay bulshanimada markii laga eego dhinica dhaqanka Maraykanka, balse waxaa laga yaabaa in aad adigu ka walwalsantahay markaad u ogalaatid, qorshe ku soco kana feker waxyaalaha ka imaankara. Hadii taas la helo, waxaa dhacda in labadbaado lana baashaalo.

Xafladaha ka dhaca meel aan guriga ahayn

Kuwa soo socda waxay ka midyihiin talooyin markii aad go'aansanaysid in aad ilmahaaga u ogalaatid iyo in kale.

- Markii ilmahaaga la marti qaado waydii goobta sida adereeska, sidee meesha u tegayaa ugana

Your teen may ask permission to attend large public events like holiday concerts, school dances and weddings with or without an older relative present. This is part of socialization and growing up in the United States, but you may be concerned about their safety and responsibilities. When you offer permission, plan and think ahead. Then teen activities can be safe and fun.

Events Away From Home

Following are suggestions when deciding if you will give permission to your teen to attend.

- When your teen gets invited to events ask: for the location,

soo noqonaya, yaa meesha jooga, maxay samayn doonaan, iyo saacadaha xaflada, wac waalidka kale si aad u habsatid in dad qaangaar ahi meesha joogi doonaan, xataa hadii cunugaagu uusan raali kaaga ahayn. Ku celcili cunugaaga hadii wax is bedeleen in aad u baahantahay in aad ugaato.

- Sii teleefoon lambarka ay kaala soo xariiri karaan. La naqtiin waxay rabaan in ay sameeyaan hadii ay rabaan in ay baxaan.
- Kula tali in aay kula soo xariiraan hadii ay u baahanyihiin lifti ama in la soo qaado. Xasuusi ilamahaaga in aysan waligood gaadhi la raacin ruux isticmaalay maandooriye.
- Soo jeed ilaa iyo inta ilmahaagu guriga ka imanayo ama u sheeg in ay ku kiciyaan markay yimaadaan. Fiiro gaar ah u yeelo hadii ilmahaagu seexdo meel kale markii xafladu dhamaato.
- Waalidku waxay u baahanyihiin qorshe hadii ay ka welwelayaan maxaa dhicdoona markii ay guriga ka maqanyihiin.
- Ka feker qorshayaashaada hadii ay dhacdo in xaflad la qabto.
- Waydiiso qaraabada dhoow ama deriska in ay reerka kuu fiiriyaan, u gee ilmahaaga ruux ka mid ah reerka inta aad maqantahay.

Kuwa soo socda waxay ka midyihiin talooyin aad raaci kartid markii ilmahaagu xaflad ku qabto guriga:

- Waydiiso cunugaaga inuu ku

including the address; how your teen is getting there and back; who will be there; what they will be doing; and the hours of the event.

- Call other parents to make sure adults will be present--even though your teen won't want you to.
- Stress to your teen that if plans change, they need to let you know. Give them a phone number where you can be reached.
- Rehearse what to do if they want to leave. Encourage them to call you for a ride if needed.
- Remind your teen never to ride with anyone who has been drinking alcohol or using drugs.
- Stay up until your teen comes home or tell them to wake you when they arrive.
- Be suspicious if your teen frequently sleeps elsewhere after an event.

Following are suggestions for when your teen gives a party:

- Have your teen draw

siiyo liiska ay ku qoranyihiin dadka imaanayo xaflada. Xasuunow xafladaha waa wayn in ay isla markiiba fowdo ka dhici karto.

- Ka feker goobta. Xafladaha waa wayn ee lagu qabto banaanka waa dhib in la xakameeyo.
- Ka caawi ilmahaaga martiqaadka xafladaha ay iyagu qabtaan waa in ay cadeeyaan xafladu in aysan ahayn mid cid walba u furan.
- Kala sheekayso cunada, cabitaanka, iyo waxyaalaha dhicidoona. Xafit waxyaalaha muhiimka ah ee goobta yaala.
- Qorshe u deji si aan laysugu jirin albaabka. Salaan caruurta markay soo galayaan.
- Weligaa waa inaad raali ka noqon waxyaalaha maanka dooriya. Dadka martida ahi waa in lagu baadhaa albaabka. U sheeg ilmahaaga in aad la xariiri doontid waalidkood ilmihii lagu qabto maandooriye. Ha u ogolaan in ay gaadhi wadaan-masuul ayaad ka noqonkartaa hadii shil dhaco. Gobolka Minnesota, ruuxwalba oo ka wayn 21 oo isagoo og siiya maandooriye ruux ka yar 21 waxa laga yaabaa in sharciga dusha ka saaro wixii qasaaro ah oo qofkaas dhaliyarada ahi keensado.
- Isku waafaqa xaliga la joojinayo xaflada.

up a list of people invited. Remember that large parties can easily get out of hand.

- Consider the place. A large outdoor party might be difficult to control.
- Help your teen decide how to issue invitations. They should state the party is not an open house.
- Talk about food, beverages, and activities. Lock up any liquor or valuable items.
- Work out a plan for "gate crashers." Greet kids as they arrive.
- Specify no alcohol or other drugs. Have guests check "backpacks" at the door. Tell your teen ahead of time that parents will be called if anyone is caught with illegal substances, including alcohol. Never let them drive - you could be liable if an accident occurs. In Minnesota, anyone over 21 who knowingly serves alcohol to someone under 21 may be held legally liable for damages caused by the underage person.
- Settle on the ending time of the party beforehand.

Title: Dhalinyarada iyo
xafladaha -Teens and
Social Gatherings

Number: 941

Authors: Colleen Gengler

Source: UofMN and UW-
Madison, "Positive
Parenting of Teens"
publication.

Year: 2003

Reviewer: Jody Dworkin, Joan
Sprain

Translators: Jamal Abdulahi



[Info-U Home Page](#)



[University of Minnesota Extension Service Home Page](#)

[Copyright](#) © 1998 Regents of the University of Minnesota. All rights reserved.